Sharciga Xuquuqda Bukaan-Socodka Minnesota
(Minnesota Patients' Bill of Rights - Somali)

Ulajeedada Smeeynta Qaanuunka

Waa ulajeedada sharci-dejiyaasha iyo ahmiyadda bayaankaan in la hormariyo danta iyo caafimaadka bukaan-socodka ee xarumaha xanaanada caafimaadka. Xarun kasta ee xanaanada caafimaadka ma weeydiin karto bukaan-sodka inuu ka tanaasulo xuquuqdiisa si loogu ogolaado xarunta. Ilaaliye kasta ee bukaan-socodka ama, markuu maqan yahay ilaaliyaha, qof ahmiyad siinayo, wuu fulin karaa xuquuqyadaan asagoo matalayo bukaan-socodka. Qof ahmiyad leh wuu fulin karaa xuquuqyadaan asagoo matalayo bukaan-socod ilaaliye leh asagoo u marayo wakaaladaha maamulka ama maxkamadda baaritaanka ama maxkamadda degmada oo sharci ku leh ilaalinta. Ayadoo la sugayo wixii ka soo baxo tallaabada fulinta, xarunta xanaanada caafimaadka, si dhab ah, weey adeeci kartaa tilmaam bixinta ilaaliyaha. Waa ulajeedada qeeybtaan in bukaan-socod kasta xuquuqdiisa bulshadeed, diineed, iyo xuquuqda go'aamada shaqsiyadeed iyo ogaashada doorashada aad heli kartid, in aan la jebin oo xarunta lagu dhiiri geliyo in eey caawinto sida ugu buuxda xuquuqyadaan.

Qeexitaanka

Ujeedada bayaankaan, micnaha "bukaan-socod" waa qof loo ogolaaday xanuun xun daraadiis xarunta lagu xanaaneeyey waqti ka dheer 24 saac, sababtana eey tahay ogaashada ama daaweeynta jirka ama caafimaadka maskaxda ee qofkaas. Micnaha "Bukaan-socod" wuxuu kaloo noqon karaa qof da'yar oo loo ogolaaday barnaamijka degganaanta sida lagu qeexay qeeybta 7, Sharciyada Minnesota 1986, cutubka 326. Ahmiyadda bayaankaan, micnaha "bukaan-socodka" wuxuu kaloo noqon karaa qof helayo xanaanada caafimaadka maskaxda oo aan xarunta degganeeyn

ama ku jira barnaamij caawinaada jaaliyadda ama barnaamijyo kale ee ku dhisan jaaliyadda.

Ku Dhawaaqidda Siyaasadda Bulshada

Waxaa lagu dhawaaqaa ineey tahay siyaasad shacbiga ee gobolkaan in eey tahay ahmiyadda bukaan-socod kasta in loo ilaaliyo siduu ku dhawaaqay sharciga xuquuqda bukaan-socodka oo eey tahay inuu ka mid ahaado, uuna ku koobnaan, xuquuqyada lagu micneeyey bayaankaan.

1. Akhbaarta Xuquuqyada

Bukaan-socodka waa in, marka la ogolaado, loo sheego ineey jiraan sharciyo xuquuqdooda ilaaliyo waqtiga eey joogaan xarunta ama inta la daaweeynayo ama lagu dayac-tirayo jaaliyadda, faalada sharciyadaa waxeey ku qoran yihiin bayaan qoraal ah ee xuquuqda la istacmaali karo iyo mas'uuliyadda ku hagaagsan qeeybtaan. Qadiyadda bukaan-socodka loo ogolaaday barnaamijka degganaanta sida lagu qeexay qeeybta 7, bayaanka qoraalka waa inuu xuquuqda u faaleeyaa qofka jira 16 sano ama ka weeyn codsashada sideeynta sida lagu qeexay qeeybta 253B.04, qeeyb-hoosaadka 2 uuna liisgareeyo magacyada iyo teleefonada shaqsiyada iyo ururada u qabta mudacaada iyo adeega sharciyeed ee bukaan-socodka iyo barnaamijyada deegaanka. Diyaafadin macquul ah waa in loo sameeyaa dadka qabo dhibaatada maqal la'aanta iyo kuwa ku hadlo luqad kale aan aheeyn Ingiriis. Siyaasadda xarumaha ee socda, qaraarka baaritaanka gobolka iyo madaxda caafimaadka gudaha, iyo micneeyn dheer ee bayaanka qoraalka ah ee xuquuqda waa in la siiyaa bukaan-socodka, ilaaliyaashooda ama qofka eey doorteen inuu matalo marka eey si macquul ah u weeydiistaan maamulaha ama qof shaqaale kale oo mas'uul ah, sida la mid ah cutubka 13, Sharciga Macluumaadka Wax qabadka, iyo qeeybta 626.557, la xiriirta dadka waaweeyn ee dayacan.

2. Xanaaneeynta Edboon

Bukaan-socodka waxeey xaq u leeyihiin in loola dhaqmo si edboon iyo xushmayn shaqsinimadooda shaqaalaha ama qofka u qabanayo adeega xanaanada xarunta caafimaadka.

3. Xanaanada Caafimaadka ee Haboon

Bukaan-socodka waa ineey helaan xaqa eey ku qorshayn karaan daaweeyn haboon iyo xanaanada shaqsiyadeed oo ku dhisan baahida shaqsiyadeed. Xaqaan waa kooban yahay meesha adeega uu shacbiga dib u dhiibeeyn ama kheeyraadka khaaska ah.

4. Aqoonsashada Takhtarka

Bukaan-socodka waa ineey helaan ama la siiyo, ayadoo qoraal ah, magaca, cinwaanka ganacsiga, numbarka teleefonka, qaas ahaan, haduu jiro, takhtarka mas'uul ka ah isku duba ridka xanaanadooda. Qaddiyadaha daaweeynta eeyna talo laheeyn, sida uu qoray dinwaanka takharka markaa jooga ee xanaaneeyo bukaan-socodka, akhbaarta waa in la siiyaa ilaaliyaha bukaan-socodka ama qof kale uu u doortay bukaan-socodka inuu asaga ama ayada matalo.

5. Xiriirka Hay'adaha Kale ee Adeega Caafimaadka

Bukaan-socodka ka helo adeega bixiye dibidda ah waxeey xaq u leeyihiin, markeey weeydiistaan, ciddii bixiyaha ah in loo sheego. Akhbaartu waa ineey ka mid ahaataa magaca bixiyaha dibidda, cinwaanka, iyo tilmaam bixinta adeega uu qabanayo. Qadiyadaha daaweeynta eeyna talo laheeyn, sida uu qoray dinwaanka takhtarka markaa jooga ee xanaaneeyo bukaan-socodka, akhbaarta waa in la siiyaa ilaaliyaha bukaan-socodka ama qof kale uu u doortay inuu asaga ama ayada matalo.

6. Akhbaarta Xanaaneeynta

Bukaan-socodka waa in uu takhtarkooda siiyo akhbaar dhameeystiran ee baaritaankoda caafimaadka, xanaaneeynta, talooyin kale, halista, iyo

natiijada ogaashada sida looga rabo inuu kuugu sheego takhtarka. Akhbaartaan waa in eey ahaataa hab iyo luqad laga filayo in uu bukaan-socodka uu fahmayo. Bukaan-socodka waxaa soo wadi karo xubin reerka ama qof loo doortay inuu matalo. Akhbaartaan waa in ay ka mid ahaataa natiijada daaweeynta ama maskaxda ee xanaaneeynta iyo wixii ka duwan. Qadiyadaha daaweeynta eeyna talo laheeyn, sida uu qoray dinwaanka takhtarka markaa jooga ee xanaaneeynayo bukaan-socodka, akhbaarta waa in la siiyaa ilaaliyaha bukaan-socodka ama qof kale uu u doortay inuu asaga ama ayada matalo.

Bukaan-socod kasta oo u dhibaatoonaya nooc kasta ee kaanserka naaska waa in sii buuxda loo ogeeysiiyaa, inta ka horeeysa ama marka loo ogolaanayo xarunta ama waqtiga eey joogto, wixii talo kale ah ee habka daaweeynta uu takhtarka yaqaano, ka mid atahay qalitaanka, raajada, ama xanaanada daawada kiimikada, ama isku darka xanaandaha, iyo halista la xiriirta hab kasta.

7. Ka Qeeyb Galka Qorsheeynta Xanaaneeynta

Ogeeysiiska Xubnaha Reerka:

(a)Bukaan-socodka waa ineey xaq u yeeshaan ka qeeyb galka qorshaha xanaanada caafimaadkooda. Xaqaa waxaa ka mid ah fursad ineey u yeeshaan kalana xaajoodaan xanaanada iyo talooyin kale bixiyaasha caafimaadka kala duwan, fursad ku weeydiistaan kana qeeyb galaan shirka xanaanada caadiga ah, iyo xaqa ineey ka qeeyb galkooda ku daraan xubnaha reerka ama dad kale eey doortaan. Haduu bukaan-socodka ka qeeyb gali karin, xubin reerka ama qof kale uu doortay waa lagu dari karaa ka qeeyb galka shirkaas.

(b)Hadii bukaan-socodka la geliyo xarunta asagoo miyir lahayn ama suuxsan yahay ama uuna hadli karin, xarunta waa ineey si macquul ah isku daydaa sida ku qoran sadarka (c) ineey ogeeysiiyaan xubin reerka

ama qofka ka mas'uul ah si qoraal ah, in bukaan-socodka si deg-deg ah loogu ogolaaday xarunta. Xarunta waa ineey u ogolaataa xubin reerka ah inuu ka qeeyb galo qorsheeynta xanaanada, hadii eeyna xarunta ogeeyn ama eey leedahay sabab eey ku aaminsan tahay in bukaan-socodka uu dhiibay horudhac amar rasmi ah ama qoraal ah ku cadeeyey in uuna rabin in qof reerka ah ka qeeyb galo qorshaha xanaanada. Marka eey ogeeysiiyaan xubin reerka inta eeyna u ogolaan inuu ka qeeyb galo qorshaha xanaaneeynta, xarunta waa ineey isku daydaa si macquul ah, sida joogta ah ee wax qabadka daaweeynta, ogaato haduu bukaan-socodka qoray horudhac amar rasmi ah oo khuseeya go'aanka xanaanada caafimaadka bukaan socodka. Ujeedada sadarkaan daraadeed, "dadaal macquul ah" waxaa ka mid ah:

(1) baaritaanka alaabta khaaska ee bukaan-socodka;
(2) baaritaanka dinwaanka caafimaadka bukaan-socodka eey xarunta heeysato;
(3) weeydiin xiriir xaalad deh-deg ah ama la xiriirid xubin reerka hadii uu bukaan-socodka uu dhiibay horudhac rasmi ah iyo hadii bukaan-socodka uu leeyahay takhtar uu u tago caadi ahaan; iyo
(4) weeydiin takhtarka uu bukaan socodka ugu tago caadi ahaan xanaaneeynta, hadii la yaqaano, haduu bukaan-socodka dhiibay horudhac rasmi ah. Hadii xarunta eey ogeeysiiso xubin reerka ama qofka loo xil saaray xiriirka xaaladaha deg-degga, ama u ogolaadaan xubin reerka inuu ka qeeyb galo qorshaha xanaanada sida tixraaca sadarkaan, xarunta mas'uul kama aha bukaan-socodka dhibaatadiisa ayagoo ku saleeysan ogeeysiiska xubin reerka ama xiriirka qofka loo xil saaray xiriirka xaaladaha deg-degga, ama ka qeeyb galka xubin reerka ineey aheeyd qalad ama eey ku xad gudubtay xuquuqda khaaska ee bukaan-socodka.

(c)Marka la sameeynayo dadaal macquul ah ee ogeeysiinta xubin reerka ama qof loo xil saaray xiriirka xaaladaha deg-degga ah, xarunta

waxeey isku dayeeysaa ineey ogaato xubnaha reerka ama qofka loo xil saaray xaaladaha deg-degga ah, ayagoo baarayo qalabka khaaska ee bukaan-socodka iyo dinwaanka caafimaadka bukaan-socodka eey xarunta heeysato. Hadii xarunta eeyna ogeeysiin karin xubin reerka ama qofka loo xil saaray xaaladaha deg-degga 24 saac dhexdooda marka la seexiyo xarunta, xarunta waa ineey ogeeysiisaa wakaaladda adeega bulshada degmada ama wakaaladda ilaalinta sharciga gudaha in bukaan-socodka la soo jiifiyay, oo xarunta eey ogeeysiin weeysay xubin reerka ama qofka loo xil saaray xiriirka xaaladaha deg-degga. Wakaaladda adeega bulshada degmada iyo wakaaladda ilaalinta sharciga gudaha waa ineey caawinaan xarunta in eey aqoonsadaan oo eey ogeeysiiyaan xubin reerka ama qofka loo xil saaray xiriirka xaaladaha deg-degga ah. Wakaaladda adeega bulshada degmada ama wakaaladda ilaalinta sharciga gudaha oo caawineeyso xarunta mas'uul kama aha bukaan-socodka dhibaatadiisa ayagoo ku saleeysan ogeeysiiska xubin reerka ah ama qofka loo xil saaray xaaladaha deg-degga ama, ama ka qeeyb galka xubin reerka ineey aheeyd qalad ama eey ku xad gudubtay xaquuqda khaaska ee bukaan-socodka.

8 Xanaaneeyn Socota

Bukaan-socodka waa inuu helaa si xaq ah in loo xanaaneeyo si joogta ah ee macquul ah iyo meeleeyn shaqaale ee socota ilaa inta eey siyaasadda xarunta ogoshahay.

9. Xuquuqda aad ku Diidid Xanaanada

Bukaan-socodka wax kala fahmayo wuxuu leeyahay xaq uu ku diido xanaaneeynta ku dhisan akhbaarta la iska rabo ee xaqa No.6. Qaddiyadaha bukaan-socodka dhiman, laakiin aan la go'aamin inuusan wax fahmeeyn, ama sharciga uu yareeynayo xaqa inuu diido xanaanada, xaaladahaas iyo duruufahadaas waa in uu si buuxda ugu caddeeyaa takhtarka markaa joogo dinwaanka caafimaadka ee bukaan-socodka.

10. Baaritaan Tijaabadeed

Qoraal, ogolaasho leh waa in la helaa inta uusan bukaan-socodka ka qeeyb gelin baaritaan tijaabadeed. Bukaan-socodka wuxuu xaq u leeyahay inuu diido ka qeeyb galka. Ogolaashada iyo diididda labadaba waa in lagu caddeeyaa dinwaanka xanaanada khaaska ah.

11. Xor ka Noqoshada Darxumada

Bukaan-socodka waa inuu xor ka noqdaa darxumada maskaxda iyo jirka sida ku qoran Sharciga Ilaalinta Dadka Weeyn oo Dayacan. "Darxumada" micnahiisa waa wax qabad ka sameeysmay xoog, ka faaiideeysi galmo, ama dhaqanka galmada oo dambiga ah sida looga hadlayo qeeybta 626.5572 qeeyb-hoosaadka 15, ama xanuun gaarsiinta jirka ama shilka, ama dhaqan is daba-joog ah loogu tala galay inuu keeno qiirad xumo. Bukaan-socod kasta waa inuu xor ka noqdaa xanaaneeyn ku dhisan kiimiko iyo xannibaad jireed, markii laga saaro xaaladaha deg-degga oo la diinwaangeliyey, ama takhtarka bukaan-socodka oo si qoraal ah ku amray waqtiyo gaaban oo go'an, iyo marka keliya uu bukaan-socodka u baahan yahay in dhaawac nafsadiisa iyo midda dadka kale laga ilaaliyo.

12 Qarsoonida Daaweeynta

Bukaan-socodka waa ineey lahaadaan xaqa ixtiraamka iyo qarsoonida khuseeyso daaweeyntooda iyo barnaamijka xanaaneeynta shaqsiyadeed. Ka hadalka qaddiyadooda, la tashi, baaritaan, iyo xanaaneeynta waa qarsoodi waana in loo qaddariyaa si qarsoon. Qarsoodiga waa in la dhoowraa waqtiga suuliga, qubeeyska, iyo wax qabadka kale ee ku sabsan nadaafadda, hadii laga saaro wixii ku saabsan amniga iyo caawinaada bukaan-socodka.

13. Qarsoonida Dinwaanka

Bukaan-socodka waa in loo ballanqaadaa xanaaneeyn qarsoon ee dinwaanooda shaqsiyadeed iyo caafimaadooka, iyo ineey u ogolaan karaan ama u diidi karaan shaqsi kasta xarunta banaanked. Koobiyada dinwaanka iyo akhbaarta qoran ee dinwaanka waa in loo dhiibaa sida uu

leeyahay qeeyb-hoosaadka iyo qeeybta 144.335. Xaqaan ma khuseeyo baaritaan cabasho iyo baaritaanka waaxda caafimaadka, ama hadii qolo seddexaad eey dooneeyso qarashka qandaraaska, ama haduu sharciga amrayo.

14. Banaandhigga Adeega la Heli Karo

Bukaan-socodka waa in la ogeeysiiyaa, waqtiga ka horeeya ama isla markaas xarunta loo ogolaanayo iyo waqtiga eey joogaan, adeegyada ka mid ah xarunta ama qarash maalmeed qolka iyo adeegyada kale ee la heli karo iyo qarashka ku darsamayo. Xarumaha waa ineey isku dayaan dadaal kasta si eey u caawinaan bukaan-socodka inuu helo akhbaarta ku saabsan hadii barnaamijyada Medicare ama Medicaid eey dhiibayaan qarashka adeegyadaas.

15. Tixgelinta Adeega

Bukaan-socodka waxeey xaq u leeyihiin tixgelin dhaqso ah iyo tixgelin macquul ah ee su'aalahooda iyo codsashadooda.

16. Qarsoodiga Shaqsiyadeed

Bukaan-socodka waa ineey xaq u lahaadan tixgelin kasta ee qarsoodigooda, shaqsiyadooda, iyo aqoonta dhaqankooda oo la xiriirta caafimaadkooda bulshadeed, diineed,iyo maskaxeed.

17. Cabasho

Bukaan-socodka waa in la dhiiri geliyaa oo la caawinaa, inta eey joogaan xarunta ama inta la xanaaneeynayo, si eey u fahmaan iyo ineey istacmaalaan xaqooda iyo muwaadinimadooda. Bukaan-socodka weey ka hadli karaan cabashadooda, weeyna ku talin karaan is-bedel siyaasadaha iyo adeegyada xarunta iyo waxyaabaha kale eey doortaan, xor ka noqdaan xannibaad, dhexgelid, jaajuub, midabtakoor, ama aar-gudasho, ka mid tahayna aarsashada in xarunta laga saarayo. Waa in lagu soo dhejiyaa meel muuqata habka digniinta cabashada ee barnaamijka xarunta, iyo cinwaanada iyo numbarada teleefonada ee Xafiiska Xarunta

ee Dacwadaha Caafimaadka iyo meelaha qaabilsan guryaha xanaaneeynta ee la socda Sharciga Dadka Waaweeyn ee Mareeykanka, qeeybta 307(a)(12).

Xarun kasta ee daaweeynta adag ee gudaha, barnaamij kasta ee deegaanka sida lagu qeexay qeeybta 7, iyo xarun kasta ee shaqa siiso wixii ka badan laba qof ee u qabta adeega caafimaadka maskaxda dadka dibadda, waa ineey leeyihiin hab cabasho gudaha ee qoraal ah, ugu yaraan sida uu habkaan leeyahay; xad waqti yar, ka mid tahayna waqti yar ee jawaabta xarunta; siin bukaan-socodka caawinaad qof u dooda; waxaa loo baahan yahay jawaab qoraal ah ee cabashada; siin waqti fiican go'aan eex la'aan oo ka yimid qof aan u dhexeeyn hadaan cabashada la xallin. Adeecidda isbitaalada, barnaamijyada deegaanka sida lagu qeexay qeeybta 7 oo ku dhisan barnaamijyada xanaaneeynta aasaaska isbitaalka, xarumaha qalitaanka bukaan-socodka dibadda qeeybta 144.691 iyo adeecidda ururada dayactirka caafimaadka ee qeeybta 62D.11 waxeey u adeecayaan qoraal gudaha ah habka cabashada.

18. Qarsoodiga Wada-Hadalka.

Bukaan-socodka waxay la xiriiri karaan ama la hadli karaan si qarsoodi ah dad uu doortay, sida lagu qeexay Sharciga Ballanqaadka Minnesota, ka tagaan xarunta sida eey doortaan. Bukaan-socodka waa ineey helaan awood, qarashkooda, qalab wax lagu qoro, iyo qalabka boostada lagu diro. Boostada khaaska ah waa in loo soo diraa ayadoo faraha aan lala gelin oo eey helaan ayadoon la furin, hadii aan daawo ahaan ama barnaamij ahaan uu u diinwangeliyey takhtarka. Waa in bukaan-socodka helaan awood teleefon eey ku dirsan karaan, ku jawaabi karaan isla markaasna ugu hadli karaan si qarsoodi ah. Xarumaha aan u heli karin meel qarsoodi ah waa ineey u sameeyaan bukaan-socodka qorshe eey teleefonka si qarsoodi ku wacan karaan. Xaqaan waa xadan yahay meesha aan daawo ahaan la ogoleeyn, sida uu u diiwaangeliyey takhtarka jooga. Sida barnaamij ahaan u xadeeyey qorshaha xarunta ka hortagga xad-gudubka ee la xiriirra Sharciga Ilaalinta Dadka Waaweeyn ee

Dayacan, qeeybta 626.557, qeeyb-hoosaadka 14, qodobka (b), xaqaan wuu xadan yahay sida loogu talagalay.

19. Hantida Shaqsiyadeed

Bukaan-socodka weey heeysan karaan oo istacmaali karaan dharkooda shaqsiyadeed, sida eey boos u heli karaan, hadii eeyna ka hor imaaneeyn xuquuqda bukaan-socodka kale, ama hadii aan xanaano ama barmnaamij ahaan eey ka horimaaneeyn daaweeynta diiwaangareeysan, amni, ama sabab dhibaato leh. Xarunta waa, laakiin qasab kuma aha rabo, ineey dhib u celiso qarashka qalabka la xaday.

20. Adeegyada Xarunta

Bukaan-socodka ma aha inuu shaqo ama adeeg u qabto xarunta haduu wax qabadkaas ka mid aheeyn xanaaneeyn daraadeed ama aan loogu tala galin dinwaan daaweeyn shaqsiyadeed.

21. Ilaalin & Adeegyada u Doodidda

Bukaan-socodka waxeey xaq u leeyihiin ineey helaan si macquul ah waqti macquul ah xuquuqda adeega ilaalinta iyo adeega u doodidda si uu bukaan-socodka u helo caawinaad iyo fahmid, jimicsi, iyo ilaalin xuquuqda looga hadlay qeeybtaan iyo sharciyo kale. Xaqaaas waxaa ka mid ah fursadda wada hadalka qarsoodiga ka dhaxeeya bukaan-socodka iyo qof matalayo adeega xaqa ilaalinta ama adeega u doodidda.

22. Xaqa Sideeynta Wada Hadalka iyo Xaqa Wada Xiriiridda

Marka laguu ogolaado xarun, oo sharciga itixaatka uusan ogoleeyn in loo siidaayo dadka soo wacayo oo soo booqanayo akhbaarta lagu aqoonsanayo bukaan-socodka, bukaan-socodka ama ilaaliyaha sharciyeeysan, waa in la siiyaa fursadda sideeynta akhbaarta joogitaanka bukaan-socodka xarunta, dadka soo wacayo ama soo booqanayo oona rabo in eey la xiriiraan bukaan-socodka. Inta eey suuroowdo, ilaaliyaha sharciyeeysan ee bukaan-socodka waa inuu tixgeliyaa rayi'ga bukaan-socodka oo ku saabsan siideeynta xarun joogidda bukaan-socodka.

XUQUUQ KALE OO DHEERAAD AH EE BARNAAMIJKA XARUNTA OO SIINAYO XANAANEEYN CARUURTA KU TIIRSAN KIIMIKADA AMA CUDURKA MASKAXDA AMA XARUMAHA ADEEG SIINAYO CARUURTA MASKAXDA LABAN 24 SAACAD.

23. Xannibaad iyo Cidleeyn

Bukaan-socod da'yar oo loo ogolaaday barnaamijka xarunta deegaanka sida ku qeexan qeeybta 7 wuxuu xaq u leeyahay inuu xor ka ahaado xannibaad jirka iyo cidleeyn hadeeyna aheeyn xaalad deg-deg ah oo ku lug leh bukaan-socodka inuu asaga ama dadka kale uu dhibaateeyo. Hababkaan looma istacmaali karo sabab edbin, xoojinta qaanuunada barnaamijka, ama sahlaansashada shaqaalaha. Cidleeynta ama xannibaada waa la istacmaali karaa marka uu ogolaado takhtarka, taakhtarka maskaxda, ama takhtarka cilmi nafsiga oo lysinka talada leh, ama marka xabka aan adkeeyn uuna fiicneeyn waqti gaaban keliya.

24. Qorshaha Xanaaneeynta

Bukaan-socd da' yar oo loo ogolaaday barnaamijka xarunta deegaanka sida lagu qeexay qeeybta 7 wuxuu xaq u leeyahay qoraal qorshaha xanaaneeynta oo ka hadlayo hab dabeecadeed qaddiyadda dhibaatada, sida saxda ah ee ahmiyadda qorshaha, iyo hababka loo istacmaali doono sida loo yareeyo waqtiga uu bukaan-socodka yar u baahan yahay xanaaneeynta. Qorshaha waa inuu sheegaa ahmiyadda siideeynta meel xarunta xannibaadeeda yartahay iyo daba-gelidda xanaaneeynta iyo adeega, hadii loo baahdo. Sida suuroowdo, bukaan-socodka yar iyo asaga ama ayada waaridkiisa ama ilaaliyaha waa ineey ka qeeyb galaan horumarka xanaanada iyo qorshaha siideeynta.

Baaritaanka iyo cabashada ku saabsan xanaanada daaweeynta ama sharciga xuquuqda bukaan-socodka waxaad u jeedin kartaa:

Minnesota Board of Medical Practice
2829 University Avenue. SE, Suite 400
Minneapolis, MN 55414-3246
Tel: (612) 617-2130
(800) 657-3709

Office of Health Facility Complaints
P.O.Box 64970
St.Paul, MN 55164-0970
Tel: (651) 215-8702
(800) 369-7994

Baaritaanka ku saabsan helitaanka xanaanada ama siideeynta aan waqtigeedi la gaarin waxaad u jeedin kartaa:
Ombudsaman for Older Minnesotans
121 East Seventh Place, Suite 410 (Metro Square Building)
St.Paul, MN 55101
Tel: (800) 657-3591 or
(651) 296-0382 (metro)

Qoraalkaan waxaa sameeyey Isbitaalada Minnesota iyo Isbaheeysiga Xanaanada-caafimaadka. Turjumaadaan waxaa maalgeliyey Waaxda Caafimaadka ee Minnesota. Hadaad u baahan tahay akhbaarta turjumaadaan, la xiriir Waaxda Caafimaadka ee Minnnesota (651) 215-8700.